BARNAAMIJKA KAALMADA TAMARTA EE GURIGA (HEAP)

MACLUUMAADKA DAKHLIGA, KA DHAAFIDA QARSOON, IYO BIXINTA CIQAABTA

Barnaamijka Kaalmada Tamarta Ee Guriga (oo loo yaqaan LIHEAP, HEAP, Kaalmada Shidaalka) ayaa bixisa lacag kaa caawisa bixinta qayb ka mid ah khidmadaha kulaylinta gurigaaga. Macluumaadka codsigaaga HEAP waxaa loo isticmaali karaa in lagu go'aamiyo u-qalmitaanka qoyskaaga ee barnaamijyada badan oo ay maamusho MaineHousing iyo Wakaaladda Wax-qabadka Bulshada ee Degaankaaga. Barnaamij kasta wuxuu yeelan karaa dakhli iyo shuruudo u-qalmitaan barnaamij oo kala duwan. U-qalmitaanka hal barnaamij si otomaatig ah uma damaanad qaado u-qalmitaanka dhammaan barnaamijyada.

Haddii aad u-qalantid HEAP, waxaad sidoo kale u-qalmi kartaa barnaamijyada hoos lagu sharraxay iyo sidoo kale barnaamijyada kale (aan halkan lagu liis gareenin) ee loogu talagalay qoysaska dakhligoodu hooseeyo.

(1) **Barnaamijka Hormarinta Kulaylinta ee Dhexe** (CHIP) wuxuu bixiyaa kaalmo hagaajinta ama beddelka nidaamyada kulaylka asaasiga ah ee xumaaday ama aan shaqaynayn.

(2) **Barnaamijka Farogelinta Xiisadda Tamarta** (ECIP) wuxuu bixiyaa kaalmo shidaal oo degdeg ah haddii caafimaadkaaga iyo badbaadadaada ay halis geliyaan xiisad ka dhalata kululaynta bilaha jiilaalka.

(3) **Qorshaha Kaalmada Dakhliga Hooseeya** (LIAP) wuxuu ka caawiyaa mulkiilayaasha guryaha iyo kiraystayaasha biilasha korontada.

(4) **Barnaamijka Caawinta Cimilada** (WAP) wuxuu siiyaa deeqo milkiileyaasha guryaha yaryar iyo kiraystayaasha si loo yareeyo khidmadaha tamarta iyadoo la hagaajinayo waxtarka tamarta guriga.

Si loo go'aamiyo loona xaqiijiyo u-qalmitaankaaga ka-qaybgalka barnaamijyada kala duwan, MaineHousing iyo Wakaaladda Wax-qabadka Bulshadu waxay u baahan doonaan inay siiyaan macluumaadkaaga shakhsiyeed iyo macluumaadka shaqsiyeed ee xubnaha kale ee qoyskaaga wakaaladaha gobolka iyo kuwa federaalka. MaineHousing iyo Wakaaladaada Waxqabadka Bulshada ayaa iyana ka heli doonta macluumaadka adiga iyo xubnaha kale ee qoyskaaga wakaaladahaas iyo kuwa kale. Adiga iyo xubnaha kale ee qoyska waa inaad saxiixdaan sii-deyn oggolaanaysa wadaagga macluumaadkaas. Intaa waxaa dheer, sii -dayntu waxay u oggolaan doontaa MaineHousing iyo Wakaaladdaada Wax-qabadka Bulshada inay kormeeraan shidaalka kululaynta iyo biilasha korontada iyo diiwaannada lacag-bixinta ee gurigaaga hadda illaa shan sannadood ka hor iyo illaa shan sannadood ka dib taariikhda codsigaaga ujeeddooyinka go'aaminta u-qalmitaanka iyo qiimeynta wax-ku-oolnimada shaqo kasta oo cimiladeyn ah oo la qabtay.

Waxaa laga yaabaa in laguu qabto si shacab ahaan ah ama dembiile sida waafaqsan sharciga federaalka ama gobolka ee aad sida ula kaca ah u samaysay bayaanno khiyaano ah ama aad u isticmaashay shidaalka HEAP hab aan waafaqsanayn shuruudaha MaineHousing ama federaalka.

MACLUUMADKA RACFAANKA

Codsaduhu wuxuu xaq u leeyahay inuu racfaan qaato oo uu helo dib-u -eegis aan rasmi ahayn iyo mararka qaarkood dhageysi cadaalad ah. Codsaduhu waa inuu soo gudbiyaa codsi rafcaan oo qoran si dib -u -eegis aan rasmi ahayn loogu sameeyo ugu dambayn:

(1) Soddon (30) maalmo taariikheed ah laga bilaabo taariikhda la calaamadeeyay ee ogeysiiska faa'idada ama diidmada;

(2) Sagaashan (90) maalmo taariikheed ah laga bilaabo taariikhda arjiga, haddii codsiga aan la ansixin ama la diidin; ama

(3) Sagaashan (90) maalmo taariikheed ah laga bilaabo taariikhda la calaamadeeyay ee codsiga dib-u-soocelinta lacag -bixinta dheeraadka ah.

Codsiyada qoran ee rafcaanka waxaa lagu soo diri karaa MaineHousing, 26 Edison Drive, Augusta, Maine 04330; ama iimaylka LIHEAPcompliance@mainehousing.org.

Dib-u-eegis aan rasmi ahayn: Dib-u-eegitaanada aan rasmiga ahayn waxaa loogu talagalay inay bixiso shuruudda ugu yar ee dhegeysiga mana aha mid u faahfaahsan sida dhegeysiga caddaaladda ah. Codsaduhu wuxuu codsan karaa, qoraal ahaan, dib-u-eegis aan rasmi ahayn wixii khilaaf ah.

Dib-u-eegista aan rasmiga ahayn waxaa samayn doona qof aan ahayn kii sameeyey ama oggolaaday go'aanka dib-u-eegista lagu samaynayo ama qof ka hooseeya. MaineHousing waxay dib u eegi doontaa faylka, waxay samayn doontaa cilmi-baaris lagama-maarmaan ah, waxayna siin doontaa codsadaha fursad uu ku soo bandhigo diidmo qoraal ama afka ah go'aanka dib-u-eegista. Marka go'aan la gaarayo MaineHousing waxay qiimeyn doontaa sax ahaanshaha xisaabinta, heerka dokumentiga uu bixiyay codsadaha, iyo saxnaanta go'aanka. MaineHousing waxay u gudbin doontaa codsadaha natiijooyinka dib-u-eegista.

Dhageysiga Caddaaladda ah: MaineHousing waxay siin doontaa codsadaha fursad dhegeysi cadaalad ah haddii codsadaha codsigiisa kaalmada la diido, ama aan lagu dhaqmin si macquul ah oo degdeg ah, ama codsaduhu uu ku murmo cadadka faa'idada. MaineHousing waxay sidoo kale siin doontaa codsadaha fursad dhegeysi cadaalad ah haddii codsadaha looga baahan yahay inuu soo celiyo lacag-bixinta dheeraadka ah.

TAKOORID LA'AAN

Qofka naafada ah oo codsanaya ama helaya kaalmada HEAP wuxuu xaq u leeyahay hoy macquul ah. Hoyga macquulka ah waa siyaasad isbeddel ama ka-dhaafitaan ah, habraac ama adeeg laga yaabo inay lagama maarmaan u tahay qofka naafada ah inuu ka qaybgalo barnaamijka. MaineHousing waxay bixin doontaa adeegyo iyo kaalmo kaabayaal isgaarsiineed oo habboon marka la codsado. MaineHousing ayaa sidoo kale ku siin doonta dukumentigan asagoo qaabab kale ah markii la codsado. Fadlan la xiriir Sarkaalka U-hoggaansanaanta Barnaamijka EHS, Maamulka Guriyeynta Gobolka Maine, 26 Edison Drive, Augusta, Maine 04330, Lambarka Taleefanka 1-800-452-4668 (codka gobolka kaliya), (207) 626-4600 (cod), ama 711 (Maine Relay).

MaineHousing iyo Wakaaladda Waxqabadka Bulshadu ma takoorto iyada oo ku saleeneysa isirka, midabka, diinta, jinsiga, jihada galmada, aqoonsiga jinsiga ama muujinta, asalka qaranka, abtirsiinta, da'da, naafanimada, xaaladda qoyska ama ilaha dakhliga ee gelitaanka ama helitaanka, ama daaweynta ama shaqaalaynta, barnaamijyadeeda, iyo waxqabadyadeeda.

MaineHousing waxay u xilsaartay qofka soo socda mas'uul ka ah isku dubaridka u-hoggaansanaanta shuruudaha takooridda federaalka iyo gobolka iyo wax ka qabashada cabashooyinka: Lauren Bustard, Maamulka Guriyeynta Gobolka Maine, 26 Edison Drive, Augusta, Maine 04330, Lambarka Taleefanka 1-800-452- 4668 (codka gobolka kaliya), (207) 626-4600 (cod), ama 711 (Maine Relay).